## Sida Wax Loo Nadiifiyo Dooliyaasha Kadib

1. Xiro cinjir ama gacmo gashiyada caaga ah iyo afxirka busta inta aad wax nadiifineyso.
2. Milanka 1 koob oo warankiilo ah ku qas 10 koob oo biyo ah ama isticmaal jeermis-dilaha guryaha.
3. Haku xaaqin mashiin, xaaqin ama ha qalajin meelaha busta leh marka aad nadiifineyso. Tani waxa ay kicineysaa kaadida dooliga ee angagtay taasoo ka koobnaan karto bakteeriyo ama fayrasyo waxyeello leh.
4. Inta aadan nadiifin kahor jeermis-dile ku rushee dhammaan meelaha wasakheysan, dooliyaasha bakhtiyey, saxarada iyo aagaga buulasha. U oggolow jeermis-dilaha inuu qooyo muddo 10 daqiiqo ah.
5. Jeermiska kadil meelaha cuntada lagu diyaariyo dushooda, armaajooyinka iyo khaanadaha, sagxadaha iyo meelaha salka darbiyada.
6. Mashiinka uumiga ku uumi shumacyada, roogaga, iyo agabka isbuunyada ah.
7. Tuur dooliyaasha bakhtiyey iyo waxyaabaha wasakheysan adigoo gelinayo bacaha balaastigga ah oo laba-laaban kuna ridayo haantaada qashinka ee bannaanka taala.
8. Ku dhaq dharka iyo go'yaasha saabuun iyo biyo kulul. Cabbir sare ku xir mashiinka dharka qallajiya.
9. Marki aad bogto, Jeermiska kadil ama tuur galoofisyada aad isticmaashay. Gacmahaaga ku dhaq ama ku qubeyso saabuun iyo biyo kulul.

**Ka taxadarka fayraska jiirka (Hantavirus)!**

Dooliyaasha lugaha cad ee deerada u eg waxa ay kaadidooda ku dari karaan fayraska jiirka (hantavirus), kaasoo dhimasho u keeni kara dadka. U oggolow dhismayaasha, cariishyada ama guryaha dadan inay hawada u furnaadaan muddo 30 daqiiqo ah kahor inta aadan nadiifin. Haddii aad qabto wax su'aala ah oo ku saabsan fayraska jiirka (hantavirus), Xarunta Maine ee Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada ka wac 800-821-5821.

### Diyaarinta & Isticmaalka Milanka Jeermis-dilaha

Milanka 1 koob oo warankiilo ah ku qas 10 koob oo biyo ah.



Si fiican u mari meesha wasakheysan una oggolow inay qoydo muddo 10 daqiiqo ah inta aadan nadiifin kahor.

### Mas'uuliyad Qaado oo Noqo Deris Wanaagsan

Waxaad gacan kageysan kartaa kahortagga dhibaatada dooliga ee xaafadaada. Furaha kahortagga dooliga waa ka hortagga xaaladaha ku xeeran gurigaaga ee hoyga ama isha cuntada u ah jiirka. Waxaad tani ku sameyn kartaa adigoo gurigaaga ka dhigaya qaab aan soo jiidasho u lahayn dooliyaasha. Kadib marka la saaro ilaha cuntada iyo goobaha buulasha jiirkana la ciribtiro, waa in la ilaaliyaa gurigaada si uusan jiirku u soo laaban.



Wixi macluumaad dheeraad ah booqo:
gotpests.org/othercritters/rats.htm

GUDDIGA XAKAMEYNTA SUNTA CAYAYAANKA EE MAINE

thinkfirstspraylast.org
pesticides@maine.gov
207-287-2731

*(Buugyaraha waxaa la soo xigtay iyada oo oggolaansho laga haysto Waaxda Caafimaadka Dadweynaha—Barnaamijka Ka Hortagga Dooliga ee Adeegyada Caafimaadka Deegaanka ee Seattle & King County*

# JIIRKA

# LAMA RABO



## Afar Tallaabo oo looga Hortago laguna Xakameeyo Tarmidda Dooliga

**Hage Loogu talagalay Milkiilayaasha iyo Kireystayaasha Guryaha**

## Xaqiiqooyinka Jiirka

**Jiirku wax walba wuu cunaa** iyo wax kaloo badan!


**Jiirka meelaha ayuu koraa, ku boodaa wuuna dabaashaa.** Haddii dabagaalle uu meel fuuli karo—jiirna waa uu fuuli karaa.

**Jiirku wuxuu goos-goostaa** caaga, alwaaxa, biraha jilicsan, fiilooyinka korontada (mararka qaar dab ayuu kiciyaa) iyo xitaa bulukeetiga furan iyo kan shubka xiran.

**Jiirku wuxuu isku ciriirin karaa** dul-duleelada yaryar, wuxuu ku hoydaa meeshi mugdi ah oo diiran wuxuuna ilmo dhali karaa 3 ilaa 4 toddobaadki kastaba!



Cabbirka dhabta ah ee duleelka uu jiirku geli karo



Cabbirka dhabta ah ee duleelka uu dooligu geli karo

## TALLAABADA 1-AAD
### Ka Qaad Cuntadooda



Dooliyaashu waxay cunaan kudhawaad waxkasta. Si aad jiirka uga takhalusto waa in aad cuntadiisa ka takhalustaa.

Ilaha cuntada dibedda ah ee guud waxaa kamid ah: cuntada shimbiraha (nooc kasta), cuntada xayawaanada rabaayada, quudka dhammaan noocyada xoolaha dabjoogga ah, qashinka cuntada ee ku jira weelka qashinka furan ee guriga, miraha ka soo daato geedo-miroodka, miraha beeriga, qashinka, abuurka cawska iyo saxarada xayawaanka rabaayada.

**Jiirku muxuu cunaa marka uu gudaha soo galo?**
Isla cuntooyinka aan cunno. Sida aan cunnooyinka ugu keydino gurigeenna waa muhiim si looga hortago jiirka. Haddii jiirka iyo dooliga ay soo gal-galaan gurigaada, **cuntooyinka badanaa baakadeysan ku keydi bokisyada kartoomada ama bacaha ku jira weelasha waara!**

## TALLAABADA 2-AAD
### Ciribtir Jiirka

Dabidda iyo sumeynta waa laba siyaabo oo wax ku ool ah oo lagu ciribtiro jiirka. Dhibaatooyinka dooliga ee qaarkood waxa ay noqon karaan kuwo aad u adag in aad iska xakameyso waxaadna ubaahan kartaa in aad soo kireysato hawl wadeen ruqsad-haysta oo ka shaqeeya xakameynta cayayaanka. Waxaad ka heli kartaa bogagga jaalaha ah ee tusaha taleefanka ee ka hooseeya "Adeegyada Xakameynta Cayayaanka."

### Dabid



Dabidda ayaa ah habka la doorbido ee lagu dilo jiirka gudaha. Dabino-qabadyada alwaaxa ah waa kuwo qiimo jaban oo wax ku ool ah. Dabinka u geli subagga lawska ama cad tufaax ah (ku xir). U dhig dabinka goob uu dooligu inta badan ku badan yahay. Waa in la dhigaa meel ka soo horjeedo darbiga. Farganku waa inuu ku jeedaa darbiga. Dabinka waxaa la dhex dhigi karaa bokis labada dhinac ka furan si looga ilaaliyo carruurta iyo xayawaanada rabaayada ah.

### Sumeynta (Cunto Ku Sumeynta)

Taxadar xad dhaaf ah waa in la sameeyaa cunto ku sumeynta jiirka iyada oo ay ugu wacan tahay halista soo gaari karta carruurta, xayawaanada rabaayadda ah, xayawaanada dabjooga ah iyo duurjoogta (hoos ka eeg). Dooliyaasha la sumeeyey waxay ku dhiman karaan sagxadaha iyo darbiyada, iyagoo keenaya ur. Walaacan dartii, sunta uma ahan doorashada koowaad ee gudaha guryaha, dad badan. U isticmaalka dibedda, sunta jiirka waxaa laga heli karaa bakhaarro badan oo iibiya qalabka iyo bakhaaraha waaxaha.

**Sunta jiirka waa in had iyo jeer lagu isticmaalaa goobo cunto loo dhigo jiirka oo ammaan ah si looga fogeeyo carruurta, rabaayada iyo xayawaanada dabjooga ah. Kaliya u isticmaal si waafaqsan tilmaamaha ku qoran.**



Meesha cuntada loo dhigo

## TALLAABADA 3-AAD
### Dooliga Ka Saar Daaradaada

Haka dhigin daaradaada aag buul u ah dooliga. Ha siin goob ay ku noolaadaan oo ay ku ilmo korsadaan.



**Jiirku waxa uu hoy ka dhigtaa:**

- Qashinka rastada ah ee bannaanka.
- Alwaaxa ama tiirarka rastada ah hoostooda. Alwaaxa rastada ah 18 inji kor uga qaad dhulka.
- Meelaha ka hooseeya geedaha beeriga, geedaha, canabyada iyo cawska dhaadheer ee aan la gooynin ama dib loo jarin.
- Gudaha gawaarida, qalabka, alaabta guriga iyo rooga dibedda la dhigay ee aan hadda la isticmaalin.
- Godadka dhismayaasha hoostooda.

## TALLAABADA 4-AAD
### Dooliga Ka Saar Gurigaaga



Meelaha yaryar ee furan ee guryaha, dhismayaasha ama cariishyada waa in la sharaa si looga ilaaliyo inuu dooliga ka soo galo.

- Hubi meelaha furan ee tuubooyinka ama fiilooyinka ay ka galaan dhismaha, meelaha saqafyada darbiga ka qabanayaan hoostooda, iyo hareeraha aasaaska salka, albaabada iyo daaqadaha.
- Isticmaal shamiito, qalab maro ¼ inji ah, shabaq ama istiil si aad ugu sharto meelaha furan.
- Meelaha guurguurashada salka hoose iyo meelaha furan ee saqafka waa in la sharaa si uusan u gelin dooliga.
- Dooliyaasha waxay badanaa ka soo galaan albaabada furan, daaqadaha ama albaabada xayawaanada rabaayadda ah. Jiingad ku dheji qeybta hoose ee albaabka si aan albaabka hoostiisa looga soo gelin.